

## Daaweynta Kimotarabiyada “Chemotherapy Treatment”

Kimotarabiyada waa daaweynta loo isticmaalo in lagu dilo unugyada kansarka. Kimotarabiyada waxay ka cawineeysaa in oo yareeyo nambarka unugyada kansarka iyo in ay yareeyso burada. Kimotarabiyada waxay siineeysaa fursad bukaan-socodka qabo kansarka naaska, waxayna daryeelayaa in lagu raysiyo ka dib qaliinka ama yareeyso xanuunka muddo ka dib in oo u sii faafo meelaha kale oo fara badan (Heerka IV).



Image: National Cancer Institute

Xiliga waqtigaas wuxuu dhamaan karaa todobaadyo ama bilooyin. Kimotarabiyada waxaa lagu sameeyn karaa rugta caafimaadka, hosbitaalka ama mararka qaarkood guriga. Goobta waxayna ku xiran tahay daawada la siinaayo iyo caafimaadka guud. Kimotarabiyada waxaa loo sameeyaa in bukaan-socodka in uusan joogin hosbitaalka habeenka. Hase ahaatee, haddii aad isku aragto matag fara badan oo saa'id ah oo keenaayo waxyeelaynta xiliga isticmaalka daaweynta kimotarabiyada, waxaa u baahan tahay in aad joogto hosbitaalka hal habeen si aad u hesho dareeraha IV (dareeraha ayaa jirka lagu shubayaa iyadoo cirbad tuubo lagu duraayo). Si kastaba ha ahaatee, waxay u badan tahay in aysan dhici Karin.

Daawada kimotarabiyada ee kansarka naaska waxaa dadka laga siiyaa afka, turitaanka cirbada xididada. Xiliga oo socdo qaabkaan waxaa lagu siinayaa daawada kimotarabiyada habka ugu fiican dhakhtarkaada kuu soo sheegaayo. Isla waqtigaas, waxaa lagu siinayaa daawooyin kale oo lagula dagaalaayo dhinacyada waxyeelaynta kimotarabiyada. Waxaana ka mid ah daawada lagugu duraayo xididada, daawooyinka alarjiga, daawooyinka ka soo horjeedo I antibiyootikada, daawooyinka korinaayo dhiiga.



Image: National Cancer Institute; Linda Bartlett, Photographer

Intee baa waqti ay qaadaneysaa kimotarabiyada la kulanka, waxayna ku xiran tahy habka lagu siiyo iyo nambarka iyo cadada daawada. La kulanka qaadashada waxay noqon kartaa kaniini lagu laqo, ama loo malaynaayo in ay qaadato saacado fara badan.

Kala hadal dhakhtarkaada arimaha ku saabsan nooca kimotarabiyada aad qaadaneeyso. Kala falanqoo wax ku quseeyo iyo waayo-aragnimada daawada. Tani waxay cawineeysaa dhakhtarka iyo kaaliyaha caafimaadka si ay kuu cawinaan adiga.

Daawada kimotarabiyada waxaa loo malayaa in ay kugu sameeyso waxyaaleeynta aadan jeclaysan, waxaana kaa reebaysaa gargaarka daawadaha xidigta laga siiyo. Hase ahaatee, la kulanka kimotarabiyada waxba kuuma dhibayso.

Chemotherapy Treatment

Somali

March 2010


## **Ka dib daaweynta Kimotarabiyada:**

Waxaa laga yaabaa in daawada u qaadato guriga si ay kuugu smeeysa raaxeysi, sida daawada ka hortaga laba-labada iyo duritaanka cirbada si loo daryeelo tirada cadada dhiiga.

Isticmaal haddii dhakhtarka kuu qoro cirbadaha duritaanka. Duritaanka cirbadaha waxay kaa cawinayaan in xanaanayaan si kugu filan unugyada dhiiga cad iyo si oo kula dagaalo cudurada jeermiga dhaliyo. Isku day in aad iska ilaaliso dadka qabo cudurada laysku daarto, gaar ahaan caruurta. Cudurada sida hargabka iyo qufaca waxay dhibaato xoog leh u gaysan karaan bukaan-socoda kimotarabiyada oo daciifiyey qaabka ka hortaga cudurka jirka. Qaabka ka hortaga cudurka jirka oo caafimaad qabo wuxuu ka cawinayaa in oo la dagaalo cudurada.



Ka dib qaadashada Kimotarabiyada, waa in aad heshaa hurdo badan. Isku day in aad cunto raashin caafimaad leh cunto inkastoo niyo aad u haynin. Cab cabitaanka fara badan si aad isaga ilaaliso biyo-bixid jirka iyo dibad uga saarida daawada kilyahaada sida ugu dhaqsiiyaha suurta gal ah.



Haddii aad qabno kansarka daahay oo waqti dambe (heerka cudurka IV), ka dib dhakhtarkaada wuxuu kuu dalbi karaa baarista soo socoto si loo arko heerka horumarka daaweynta Kimotarabiyada: baarista dhiiga, baarista gaadida, raajiyada "X-rays", ultrasoondi (waa baarista loo isticmaalo hiirarka codka si loo ogaado burada), MRI iskaanka (waa baarista loo isticmaalo hirarka bir-lab si loo qaado sawirada jirka gudahiisa), CT iskaanka (waa nooc raajiyada loo isticmaalo kumbiyuutarka si loo sawiro jirka gudahiisa), lafaha iskaanka (waa nooc raajiyada ku tuseeyso nawaaxiga waxqabadka aan caadiga aheen lafta), ama dhuuxa lafta biyobsis "biopsies" (baarista tusaalo ka qaadida dhuuxa lafta; dhuuxa waa qaybta dhexe ee lafta halka laga sameeysto dhiiga).